

COVID-19 | Maatregelen | 26/04/2021

Somali | Vertaald uit het Nederlands

Talaabooyinka 26 Abriil

Hordhac

Dawladdu waxay leedahay xeerar si ay fayraska Koronaha u joojiso. Xushmee xeerarka. Haddii aad sidaas yeesho xanuunku kugu dhici maayo qof kalena ku ridi maysid. Bilayska ayaa ku kantarooli kara.

Fiiro gaar ah: Magaalooyinka iyo degmooyinka qaarkood waxay leeyihiin xeerar dheeri ah. Hubi bogga interneetka ee magaaladaada ama degmadaada.

Xeerarka dahabi ah

- Marar badan gacmahaaga ku dhaq biyo iyo saabuun.
- Xiro maaskaro afka ah
- Ka fogow ugu yaraan 1.5 mitir dadka kale.
- Xiriir kaaga dhaw ku xaddid ugu badnaan 1 qof. Qofka xiriirkaaga dhaw ah 1.5 mitir In aad ka fogaato looma baahna.
- Fiiro dheeri ah u yeelo bukaanada nugul (halista ku jira):
 - dadka da'doodu ka wayntahay 65 sano.
 - dadka wadnaha, sambabada ama kalyaha dhibaato ka haysato
 - dadka infekshanka degdeg u qaada.
- Ku shaqee guriga.
- Si fiican u layri guriga: daaqadaha fur.
- Waxa fiican in aad dadka dibadda kula balanto.

In magaalo kale ama dal kale la aado

- Beljamka gudihiisa:
 - Si xor ah ayaad ugu dhax safri kartaa.
 - Ma isticmaashaa gaadiidka dadweynaha (bas, taraam ama tareen)? Ma ka wayntahay 12 sano? Xiro maaskaro afka. waa waajib.
 - Laguuma ogola inaad banaanka u baxdo inta u dhexeysa 24 saac ama 12-ka saqda dhexe iyo 5ta subaxnimo (6 saac saqda dhexe iyo 11 saac subaxnimo). Brussels laguuma oggola inaad banaanka u baxdo inta u dhexeysa 10 habeenimo iyo 6da aroornimo (4 saac habeenimo iyo 12 saac subaxnimo).
- Dalka dibaddiisa in aad aaddo:

- Waxa fiican dalka dibaddiisa in aadan u safrin
- Sidaas oo ay tahay ma ku qasbantahay in aad dalka dibaddiisa aaddo? Waxa jira 3 midab oo koodha ah(kleurcodes).
 - ▶ Guduud(Rood): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaadda ay sarayso. Halkan ha u safrin.
 - ▶ Liimi(Oranje): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaadda dhexdhexaad ay tahay. Halkan waxa fiican in aadan u safrin.
 - ▶ Cagaar(Groen): waa deegaan ama dal halista coronaha in aad qaadda ay hoosayso. Halkan waad u safrin kartaa.
 - ▶ Ka fiiri bogga internetka <https://www.info-coronavirus.be/nl/kleurcodes-per-land/>
- Dalka aad aadayso xeerarka ka jira ka fiiri bogga internetka ee diplomatie.belgium.be
- Safaradda / ku soo laabashada Biljam
 - Ma soo joogtay in ka badan 48 saac dalka dibaddiisa ?
 - ▶ Waxa aad buux-buuxinaysaa warqadan (formulier) <https://travel.info-coronavirus.be/nl/public-health-passenger-locator-form>.
 - ▶ Ma lagu soo diray fariin sms ah ? Waa qasab in aad karantiil gasho. Waxa qasab ah inaad guriga joogto ugu yaraan 7 maalmood. Waxaad mari doontaa baaritaanka corona maalinta 1aad iyo maalinta 7aad. Malaguu soo diri waayay fariin qoraal sms ah? Qasab maaha in aad karantiil gasho.
 - ▶ Ka fiirso: waxa lagugu ganaaxi karaa 250 euro haddii aadan sidan sameyn.
 - Ma deganid Beljamka oo ma imanaysaa Beljamka? Markaa waa inaad sameysaa baaritaanka corona 72 saacadood ka hor intaadan imaan Beljamka. Natiijadu waa inay noqotaa in lagaa waayay.

Shaqo

- Ku shaqee guriga. Tani waa qasab.
- Mase ku qasbantahay in aad shaqo aaddo?
 - Waa inaad xirataa maaskaro afka ah.
 - Si fiican u layri: daaqadaha fur.
- Su'aalo ma qabtaa? Waxa macluumaad ku siindoona maamulahaaga.

Dukaammada

- Dukaamadu way furan yihiin.
 - Waxaad la adeegan kartaa ugu badnaan hal qof oo dheeri ah. Qofkaas waa inuu noqdaa qof aad la nooshahay.
 - Ma gelaysoo dukaanka? Marka hore, jeermiska ka dil gacmahaaga.
 - Waxaad adeegan kartaa ugu badnaan 30 daqiiqo.
 - Xiro maaskaro afka ah. Tani waa qasab.
- Waxaa jira suuq. Suuqyada alaabada la isticmaalay, lama oggola.
- Dukaanka habeenkii shaqeeya waxa uu furan yahay ilaa 22 saac (10ka habeenkii ama 4 saac habeenimo).

- Lama oggola inaad khamro iibsato wixii ka dambeeya 20 ka saac (8da fiidnimo ama 2 saac fiidnimo).
- Timajarayaasha iyo xirfadaha kale ee aan caafimaadka xiriir la lahayn way furan yihiin. Tusaale ahaan: daryeelka cagaha iyo qurxinta cidiyaha, goobaha qurxinta gaarka.

Hoteellada, maqaaxiyaha iyo kafateeriyadaha

- Kafateeriyadaha iyo maqaaxiyaha waa la xiray.
- Cunto waad ka soo qaadan kartaa ilaa iyo 22ka saac (10ka habeennimo ama 4 saac habeennimo).
- 8-da Maajo, barxadaha hore ee maqaaxiyaha iyo kafateeriyadaha waxay furnaan karaan 8:00 subaxnimo ilaa 22 habeennimo.
 - Waxaad miiska la fariisan kartaa ugu badnaan 4 qof. Ama dadka aad la nooshahay.
 - Waa inaad ku ekaataa fadhiga miiska. Qasab ma aha in aad xirato maaskaro afka ah.
 - Musqusha ma u baahan tahay? Markaa xiro maaskaro afka ah

Xiriirka bulshada

- Waxaad xiriir dhow la yeelan kartaa ugu badnaan 1 qof oo isla isaga ah. Markaa in aad kala fogaataan 1.5 mitir looma baahna.
- Qof gurigaaga ma ku martiqaadaysaa? Xubin kasta oo reerka ka mid ah waxaa loo ogol yahay inuu guriga ku marti qaado 1 qof oo xiriirkiisa dhaw ah. Dadkan looma ogola inay isku mar guriga wada joogaan.
- Kalidaa ma nooshahay? Waxaad gurigaaga ku martiqaadi kartaa qofka xiriirkaga dhaw ah iyo hal qof oo dheeri ah. Shaqsiyaadkan lama ogola in ay isku mar gurigaaga joogaan.
- Waxaad banaanka la joogi kartaa koox ugu badnaan 10 qof ka kooban. Waa inaad ilaalisaa kala fogaanshaha masaafada ee 1.5 mitir. Caruurta da'doodu tahay ilaa 12 sano tirada kuma jiraan.

Dhaqdhaqaaqa

- Waxaad banaanka kula jimicsan kartaa ugu badnaan 10 qof. Ilaali masaafada kala fogaansho ee 1.5 mitir
- Jacuzzi, qolalka uumiga iyo hammaamka, buuraha barafka iyo xarumaha jimicsiga way xiran yihiin.
- Barkadaha dabbaashu way furan yihiin.

Waqtiyada firaaqada

- Maxaa furan?
 - Maktabadaha
 - Beeraha ciyaarta ee banaanka
 - Matxafyada
 - Jardiinooyinka xayawaanka
 - Jardiinooyinka dalxiiska, bangalooyinka jardiinooyinka iyo xeryaha dalxiiska
 - Meelaha kale way xiran yihiin. Tusaale shineemooyinka, goobaha-khamaarka iyo jardiinooyinka madadaalada.

- Lama ogola dhacdooyin ama bandhigyo. Tusaale ahaan: tiyaatar ama riwaayado. Laga bilaabo 8-da Maajo dhacdooyinka ilaa iyo 50 qof ka kooban waa la oggol yahay. Tani waxa lagu qaban karaa oo kaliya banaanka.
- Waxqabadyada abaabulan ee loogu talagalay carruurta ilaa iyo 18 jir-ka ah waxaa loo oggol yahay ugu badnaan 10 qof. Da'yarta jirta 13 illaa 18 waa in waxqabadka loogu sameeyaa bannaanka. Goobta in loo dhaxo/ la seexdo Lama ogola. Laga bilaabo 8da Maajo waxqabadyada abaabulan ee da 'kasta leh waxa ka soo qayb gali kara ugu badnaanna 25 qof. Tani waxa lagu qaban karaa oo kaliya banaanka.

Diinta

- Adeegyada cibaadada waxaa loo oggol yahay ugu badnaan 15 qof. Carruurta da'da ilaa iyo 12 sano iyo adeegaha cibaadada (tusaale ahaan wadaad ama imaam) tirada kuma jiraan.
- Xafladaha aroosyada waxa loo oggol yahay ugu badnaan 15 qof. Carruurta da'da ilaa iyo 12 sano iyo diiwaan-hayaha arimaha bulshada ama adeegaha cibaadada (tusaale ahaan wadaad ama imaam) tirada kuma jiraan. Munaasabadda ka dib cunno ma jirto.
- Aaska waxaa loo oggol yahay ugu badnaan 50 qof iyo ugu badnaan 10kii mitir ee isku wareeg-ba 1 qof. Carruurta ilaa da'da 12 sano iyo diiwaan-hayaha arimaha bulshada ama adeegaha cibaadada (tusaale ahaan wadaad ama imaam) tirada kuma jiraan. munaasabadda ka dib cunno lama ogola.

Xanaanooyinka (Crèches) iyo Iskuulka

- Xanaanooyinka (crèches) way furan yihiin.
- Carruurta waxay dib ugu laaban karaan iskuulka. Waxbarashada dugsiga sare, carruurta qaar waxay casharada ku qadanayaan guriga. Iskuulkaaga ayaa ku siin doona macluumaad dheeraad ah.

Dhiirigelin

Xeerarkan waxa ay muhiim u yihiin caafimaadka qof kasta. Qofkasta waxa laga rabaa in uu xushmeeyo.

Inaad sidaa yeesho waad ku mahadsantahay. Si wada jir ah ayaan fayraska Corona-ha u joojinaynaa.